

# Talooyinka Ijaartayaasha

1. La shaqee milkiilaha guriga si aad u fahamto adeegyada aad bixiso, aadna fasax u weydiisato ka hor inta aadan beddelin heshiiskii aad gashay.
2. Ku beddel nalalka iftiinka ee LED-ka oo dami nalalka marka aan la isticmaalin. Qaado nalalkaas haddii aad go'aansato inaad ka guurto guriga.
3. Si hufan u isticmaal agabka iyo elektiroonigga.
  - Istimmaal mashiinka alaabta lagu dhaqo marka aad dhaqaysid alaab badan oo buuxisa mashiinkaan, alaabtana ku qallaji mashiinkaan "air dry."
  - Istimmaal mashiinka dharka lagu dhaqo markaad dhaqanaysid dhar badan. Ku dhaq biyo qabow marka ay suurtagal tahay. Iska yaree isticmaalka qalajiyaha dharka adiga oo aan engegin oo aan isticmaalin maro qalajiyaha. Nadiifi dabinnada mashiinka ka dib markasta oo aad dhar ku dhaqatid.
  - Cuntada ku karso digsigga afka laga xiro ee "crackpot" iyo mikrowayfka.
  - Qaboojiyaha buuxi, laakiin ha buux dhaafin.
  - Nadiifi gariiradaha qaboojiyaha.
4. Gebi ahaanba demi qalabka elektiroonigga ah iyo/ama isticmaal fiilooyinka korantada si aad u yarayso isticmaalka tamarta xad-dhaafka ah.
5. Heerkulbeegga ku hay 68 darajo ama ka hoos hoos xilliga qaboobaha, hoosna u dhig ilaa 10 darajo markaad guriga ka maqan tahay iyo markaad seexanayso.
6. Bilaha qaboobaha, xidh meelaha hawadu guriga ka soo gasho (haddii mulkiiluhu aanu guriga ku sameyn dayactir joogto ah).
  - Ku isticmaal bac koollo ah si aad u awdo daaqadaha.
  - Istimmaal waxyaabaha albaabka xirah (iibso ama samee mid adigoo duubaya shukumaan).
7. Dahaarka daaqadaha ha furnaadaan xilliga jiilaalka inta lagu jiro iftiinka maalintii si aad u diiriso qolalkaaga; xidhi maalmaha xagaaga si aad u yarayso kulaylka.
8. Isku qor barnaamijka qaboojiyaha oo ay bixiso hay'adaha tamarta ee deegaankaaga haddii aad leedahay qaboojiye dhexe.
9. Haddii aad keento unugga qaboojinta daaqadaha, raadi unugga lagu qiimeeyey habka Energy Star.
10. Istimmaal marawaxadaha si aad u yarayso baahida qaboojinta.



**CITIZENS UTILITY BOARD**  
Empowering Minnesota Consumers

[www.cubminnesota.org](http://www.cubminnesota.org) [info@cubminnesota.org](mailto:info@cubminnesota.org) 1-844-MINN-CUB